



Wixii Isboortiga kasoo Kordhay: Kooxda Kubadda Cagta Gabdhaha Grant oo Taariikh ku Dhigay ku Guulaysiga Darajada Gobolka ee Koowaad

Kooxda kubadda cagta gabdhaha Dugsiga Sare ee Grant ayaa taariikh dhigay Sabtidii, iyagoo ku guulaystay horyaalka gobolka ee koowaad taariikhda barnaamijka. Ciyaar weerar-iyo-weerar-celis ah oo ku tirsanayd gunaanadka Class 6A oo ka dhacday Garoonka Hillsboro, Elle Frazier ayaa ku dhalisay 5 daqiiqo iyo 19 ilbiriqsi wakhtigii dheeraadka ahaa taasi oo keentay inay Generals-ku 4-3 kaga guulaystaan Beaverton.

Frazier waxay ka dhalisay meal 12 tallaabo u jirta goolka kadib baas uga yimi juuniyeer Katarina Roesinger taasi oo keentay in Grant uu ku guulaysto horyaalka gobolke ee saddexaad ee kubadda cagta gabdhaha ee kooxda Liigga Dugsiyada Portland. Generals-ku waxay ku biireen Lincoln, oo ku guulaystay koobka 2007 iyo 2008, ciyaar haysatay horyaalka gobolka ee Oregon ilaa 1977.

Frazier sidoo kale waxay dhalisay gool aan cidi ka caawin 7:40 markii ciyaartu socotay iyo gool ay ka caawisay fereshmaan Kate Ratanaproeksa taasi oo siisay Grant inay ciyaarta ku hoggaamiso 2-0 markay ciyaartu socotay 11:52. Hawlqabadku wuxuu boqray xiddigta xilli-ciyaareedka taasi oo Frazier loo codeeyey inay noqoto ciyaaryahanada PIL ee sanadka.

"Aad ayey u fiicnayd sanadka oo dhan," ayuu tabobaraha Grant, Emmanuel Tjuanakis, u sheegay wariyayaasha. "Waxay ahayd ciyaaryahanad kooxda horseed u ah taasina maanta ayey muuqataa."

Beaverton ayaa soo rogaan celisay iyadoo dhalisay 2 gool inta ciyaarka nuskeeda hore aanu dhicin, iyadoo nuskii dambe ee ciyaarta aan waxba la kala dhalin, kooxuhu waxay wakhtigii dheeraadka ahaa galeen iyagoo leh 2-2.

Wakhtigii dheeraadka ah wuxuu ku bilaabmay dardar iyadoo Roesinger dhalisay gool aan laga caawin markii ciyaarta wakhtiga lagu daray uu socday 1:43. Beaverton waxay ciyaarta barbaraysay 41 ilbiriqsi kadib, waxaana xigay markii dambe Frazier oo goolka guusha dhalisay.

"Caadi ma aha," ayay dhahday Frazier. "Guushii koowaad ee taariikhda barnaamijka. Waa waxaanu u halgamaynay. Waa wax yaab leh."

Guusha waxay ku dhammaatay xilli Grant uu gaaray 17-1-1 uguna guulaystay darada PIL rikoodhka liigga 5-0-1 iyadoo uu hoggaaminayo Tjuanakis, kaasi oo la wadaagay abaalmarinta tabobaraha sanadka ee PIL kan Cleveland, Douglas Diller. Intii ciyaaraha horyaalku socdeen, Generals-ku waxay dhaliyeen 56 gool iyagoo lix ciyaarood oo kaliya laga badiyey ka gadaal markii afar ciyaarood oo isku xiga aan gool laga dhalin intii ciyaaruhi socdeen.

Grant waa markii labaad ee uu ka soo muuqanayo ciyaaraha horyaalka gobolka. 2010, Jesuit ayaa Generals-ka kaga badiyey 2-1 wakhtigii dheeraadka ahaa. Grant waxay ku guulaysatay horyaalka gobolka ee kubadda cagta laba jeer maadaama ay kooxda wiilashu ay 2010 iyaguna ku guulaysteen iyagoo 3-1 kaga badiyey Westview ciyaartii gunaanadka.